

**Shirweynaha jaaliyada Somalida Ogadenia ee South Africa oo maalintii 2aad ka socda Port Elizabeth, Boqolaal qof ooy kujiraan South African oo ka qayb galay , Calanka Ogadenia iyo midka South Africa oo noqday astaanta Shirka.**



Shirkan oo ah mid ay Jaaliyada Somalida Ogadenia sanad walba ku qabato Xorunta Jaaliyada oo Ku taala magaala Madaxda Gobalka Eastern Cape ee Port Elisabeth ayaa furmay Khamiistii shalay wuxuuna socon doonaa ilaa maalinta Sabtidaha ah sida lagu wado . Shirka ayaa waxaa soo buuxdhaafiyay Boqolaal qof oo isugu jira Rag, Dumar Caruur u dhalatay Dalka Gumaysiga Ethiopia haysto ee Ogadenia. Dadkan Somalida Ogadenia oo ay Caadifad iyo Ca'dho ay Gumaysiga Ethiopia U qabaan ka muuqatay ayaa kakala yimid Magaalooyinka Cape Town , Johannessburg, Pretorea. Durban, East London, Queenstown iyo guud aahaan Magaalooyinka ku teedsan Gobalkan Martida looyahay ee Eastern Cape





Sidoo kale Shirka waxaa ka soo qaybgalay Saraakiil Ka socotay Haayadaha Refugee Rights Centre: oo hoos tagta Jaamacada Nelson Mandela University , South African National Civic Organisations (SANCO) , Sarkaal ka socday Xafiiska Duqa Magaalada ( Office of the Mayor) iyo Mr. MW Kelani oo ah Siyaasi rug Cadaa ah oo aad looga tixgaliyo Dalkan South Africa Una ollaleeya Madax banaanida Somalida Ogadenia. Dhamaan Saraakiishan Ayaa carabka ku dhuftay in la dhowro xuquuqada dadka qaxootiga ah lagana wadashaqeeyo sidii taas loo hirgalin lahaa mar uu hadlayay Mr. David oo ahaa Sarkaalka ka socday Xarunta xuquuqda qaxootiga ee Jaamacada Nelson Mandela ayuu sheegay in qofka qaxootiga ah yahay qof kulan saday 3 arimood, 1-Qof wadankiisii uga soo cararay Dhibaato ka jirta darteed ooy naftiisu halis galayso haduu ku noqdo ,2- qof dalkiisa ka jiro dagaal hubaysan (Armed Conflict) iyo ugu danbayn qof dalkiisa ku habsatay Masiibo (Natural Disaster) Wuxuuna masuulka xusay in Dadka Somalida Ogadenia iyo kuwa Somalia ka yimid ba ay yihiin Qaxooti rasmi ah ayna xaq u leeyihiin inay wadankan ugu noolaadaan si xoriyad ah wuxuuna ka codsaday Madaxda Jaaliyada Somalida Ogadenia inay wada shaqayn buuxda dhexmarto iyaga iyo haayadaha qaabilsan arimaha qaxootiga iyo kuwa dawlada South Africa. Mr. MW Kelani oo ah Siyaasi rug'cadaa ah una ollaleeya qadiyada Somalida Ogadenia Ayaa hadalkiisa ku bilaabay Amaanda Ogadenia oo ah halkudhag ay isticmaalaan dadka u soo halgamay Xoriyada Dalkan South Africa sida ururka ANC Macnihiisuna yahay Ogadenia Hanoolaato wuxuuna ka codsaday dadkii goobta yimid inay u jibiyaan ooy ka daba dhahaan Aweetu oo ah ha noolaato Waxanaa hal mar isla shanqadhay Hall kii Shirka kadib markay

Boqolaal qof ka daba dheheen Aweetu . Waxaa isu ekaa halku'dhaga Halganka ANC iyo Midka ONLF taas ayaana fududaysay inay Somalida ogadenia durba la qabsadaan halku'dhag Halgameedka Walaalahooda South Africa.



Dar'daarran Kadib in la wada shaqeeyo waxaa la fasaxay Martidii ka Socotay Haayadaha Dalka South Africa Waxanaana goobta isugu soo hadhay Boqolaal Somalida Ogadenia ah oo oo sidaan horay u sheegay wajiyadooda ka muuqatay Ca'dho iyo Caadifad ay u qabaan Gumaysiga Ethiopia oo baryahan danbe Xasuuq iyo xidhxidh hor leh ka wada Gudaha Ogadenia , Boqolaal kan qof ayaa ku labisnaa dhar lagu Sharaxay Calanka Ogadenia raga ayaa ka dulqabay labiskooda Funaanado ku sharaxan Calanka Ogadenia kuna qoranyihiin halku'dhagyo halgameed oo Gumaysiga ka Ethiopia ka dhan ah Gobanima doonka ONLF na garabtaagan . Dumarka Somalida Ogadenia oo Sida Dumarka Soomaliyeed guud ahaanba Eebe weyne ku manaystay Qurux hida ah Ayaad moodaysay inuu sii qurxiyay Calanka Ogadenia oo uusan ka madh'nayn Midka Somali weyn oo kaga jira dhexda watana Xidigtii 5ta gees lahayd una taagan 5 ta Somaaliyeed Sida aad ka dheehan doontaan Sawiradan waxay indhahaygu qabanayeen Gabdho aad moodo in ay ka qayb galayaan tartanka quruxda Somaliweyn kuna labisan dhar lagu sharaxay Calanka Ogadenia waxay sidoo kale Wateen Calanka Ogadenia iyo astaamo muujinaya Halganka Somalida Ogadenia ugu jirto xoraynta Dhulka Somalida Ogadenia ee ay Ethiopia Gumaysato.



Shirka oo saaka markale Dib u furmay abaarihii 10 subxanimo waxaa lagu furay aayado Qur'aan ka kariimka ah kadibna waxaa lagu soo dhaweeyay hogaanka Jaaliyada Somalida Ogadenia ee South Africa (JOKA) u qaabilsan xidhiidha ka Didlamaasiyada wuxuna ka warbixiyey wixii uga qabsoomay arimaha siyaasada ee wadankan koonfur afrika wuxu aad uqeexay dacawad Ethiopia kan dhan ah oo jaaliyada Ogadenia ee Koonfur Africa u gudbiyey Qaadiga sare ee maxakamada South Africa , Madaxa laanta danbi baadhista , Taliyaha Police ka South Africa iyo wakiilka maxkamada Aduunka ee Hague u fadhiya dalkan South Africa . Dacwadan oo la gudbiyay 07-02-2012 ayaa Ethiopia ku abuurtay Khal'khal ayna filanaynin waxayna keentay inay Ethiopia noqoto hal gowracan geed kama gudo waxaana la xasuustaa in Ethiopia 12 -02-2012 Xasuuq hor'leh ka gaysatay Dagmada Gunagado ee Gobalka Dhagaxbuur iyadoo muda 2 asbuuc gudahood ah ku dhisay shacab kor udhaafaya 35 qof. Sidoo kalana xidhxidhay Ugaasyo iyo salaadiin magac weyn kuleh Bulshada Ogadenia oo uu ka mid yahay Ugaaska Gobalka Qoraxey Ugaas Maxamed Duulane Ugaas Xaashi oo ilaa haatan Xabsiga kujira waxaa intaas garabsocda Taalaabooyin ka baxsan anshaxa Bini aadnimada ooy Ciidamada Ethiopia kula kacayaan Gabadhaha qaaliga ah ee Soomaaliyeed iyagoo 13 Bishan Maarso ku kufsaday 16 gabdhood dagmada Lagahida ee Gobalka Nogob Waxayna Arintaas sii xoojisay dacwadii Ethiopia ka dhan ka ahayd iyadooy 26kii Febaraayo Shir jaaraa'id isugu yimaadeen in ka badan 7da haayadood oo xuquuqul insaanka u dhaqdhaqaaqa iyo Boqolaal Somali ah Magalada CapeTown waxaana hoosta laga xariiqay in Gumaadka Qarsoon eey Ethiopia ka wada Ogadenia aan la aqbali Karin waxaana ilaa haatan socda Shirrar lagaga arinsanayo qadiyada Ogadenia oo dhexmaraya Somalida u dhalatay Ogadenia iyo haaydaha kala duwan ee Dalkan South Africa.





Dhanka kale Shirka ayaa dib u furmi doono maalinta Barri ah iyadoo ay Jaaliyada Somalida Ogadenia ee Koonfur Africa dooran doonto Maamul sii adkeeya Dacwada Ethiopia ka dhanka ah eey hallis ugu jirto in Madaxda Dawlada Ethiopia looga yeedho maxkamada Caalamigaha ah ee danbiyada dagaalka haday cagta soo dhigaan dalka South Africa na iska cadahay in Xabsi la galin doono.

Maxamed Xaaji iyo Cumar Jigjiga , Nelson Mandela Bay/ Port Elizabeth, South Africa .

[Saxafi2009@gmail.com](mailto:Saxafi2009@gmail.com)

